

**BADBAADADA IYO FAA'IIDOOYINKA**

Heshiiskani wuxuu daboolayaa dhamaan wixii dhaawac ama hadii uu dhumo iPad la amaahiyay ardayga wixii ka badan \$ 100.00. Wixii dhaawac ama dayactir oo qiimahoodu uu ka yarahay \$ 100.00 ma bixinayo. Caymiska waa 24 saac maalintii. Qiimaha guud waxaa la go'aaminayaa marka uu lumo ama dhaawac soo gaaro. Ma jiro wax qiimo ah oo ka badan \$ 300.00. Haddii ay dhacdo in uu dhaawac ama dhumo, caymiskani wuxuu bixin doonaa 85% (illaa \$ 255.00) wixii dhaawac ama khasaara soo gaara. Adiga ayaa mas'uul ka ah 15% (illaa \$ 45.00) dhaawaca ama khasaaraha soo gaara. Maamulka Dugsiyada Dadwaynaha ee Lexington waxay xaq u leeyihiin inay kala noqdaan iPad ardayga wakhti kasta ay u arkaan in si qaldan loo isticmaal ama xad gudub lagu saameeyay.

**GOORTA UU BILABANAYO iyo TAARIIKHDA DHICITAANKA**

Ceymiskani wuxuu bilaabanayaa taariikhda aad codsatay iPad iyo waliba marka aad bixisid lacagta caymiska kombuyuutarka laga bilaabo aad codsatay ilaa aad dib ugu soo celinaysid iskuulka, isaga oo ah mid wanaagsan oo shaqeynaya, dhamaadka sanad dugsiyeedka ama marka ardaygu katagayo dugsiga degmada.

**Kharashka caymiska**

Qiimaha guud ee caymiska waa \$ 25.00 sanadkiiba. Caymiska hadii uu kuu bilaawdo semestarka dhexdiisa lacag laguuma soo celinayo.

Waxaa la isku raacay oo la fahmay in:

- ◆ Dugsiyada Dadweynaha ee Lexington waxay bixin doonaan caymiska dhammaan ardayda. Ciwaanku waa mid ikhtiyaari ah.
- ◆ Arji gooni ah waa in loo buuxiyo arday kasta si uu caymis u gashto iPad.

Buuxi macluumaadka soo socda. Ku soo celi foomkan iyo lacag ta xafiiska dugsiga ilmahaagu dhigto.

**Foomkan waa in la buuxiyaa oo la calaamadeeyaa HAA ka hor inta aan kombuyutarka lagala bixin iskuulka.**

TAARIIKHDA \_\_\_\_\_ FASALKA \_\_\_\_\_ LAMBARKA ARDAYGA \_\_\_\_\_

MAGACA ARDAYGA \_\_\_\_\_

CINWAANKA GURIGA \_\_\_\_\_

(Wadada, Magaalada iyo Zip-ka)

TELEFANKA GURIGA \_\_\_\_\_

<div style="text-align: center;"> <input type="checkbox"/> <b>HAA</b> </div> <p><b>Waxaan jeclaan lahaa in aan ka qayb qaato barnaamijka Caymiska dhumida iyo dhaawaca.</b></p>	<div style="text-align: center;"> <input type="checkbox"/> <b>MAYA</b> </div> <p><b>Madoonayo caymiskani waqti xaadirani. Waan fahamsanahay in ilmahayga aan loo oggolaan doonin inuu guriga iPad-ka usoo qaato waxaan mas'uul ka ahay 100% wixii waxyeelo ama khasaaro ah ee soo gaara iPad-ka uu iskuulka ilmahayga amaahiyay inta uu iskuulka joogo.</b></p>
Taariikhda	
Qor Magaca Waalidka:	
Saxiixa waalidka:	